Macluumaadka Aasaasiga Ah ee Waalidiinta

Waalidka dhalay ilmaha loo fidiyo adeegga waxbarashada gaarka ah, waxa ay leeyihiin xuquuq ay siiyeen sharciyada dawladda dhexe kuwaas oo lagu magacaabo Sharciga Dadka Naafada ah iyo Waxbarashada (IDEA). Sharcigan waxa uu faahfaahin ka bixinayaa sugidda xaqa ay waaalidiintu ay leeyihiin xuquuq u dhiganta xubnaha kooxda go'aanka ka gaareysa waxbarashada ilmahaaga.

Marka lagu wargeliyo xuquuqdaada (si qoraal ah, ku qoran luqadda aad ku hadasho) xuquuqda sharcigu kuu ogol yahay (xuquuqdaada sharciga ah) oo aad heli karto. Nuqul ka mid ah xuquuqda waa in dugsigu ku siiya inta uu socdo nidaamka. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada ama sida wanaagsan ee aad ula shaqeyn karto dugsiga, fadlan la xiriir Xarunta Waalidiinta ee Utah ee 801-272-1051 ama soo booqo barta internetka ee www.utahparentcenter.org

Waa Maxay Waxbarashada Gaarka Ah?

Si toos ah looga soo xigtay IDEA

'Waxbarashada Gaarka Ah' waa mid loogu talo galay barashada, oo waalidka lacag la'aan ku ah, si wax looga qabto baahida gaarka ah ee ilmaha naafada ah, oo ay ka mid tahay, barashada jimicsiga, barashada guriga, iyo barashada isbitaalka iyo goobaha waxbarashada.
Erayga waxaa ka mid ah daaweynta hadalka, ama adeegyo kale oo la xiriira...Erayga waxa kale oo ka mid ah **waxbarashada xirfadaha** haddii uu jiro takhasus gaar ah.
Hab waxbarasho oo si gaar ah loogu talo galay, oo waalidka aan lacag laga qaadin, taasoo loogu talo galay wax ka qabashada baahida gaarka ah ee ilmaha naafada ah.

'Adeegyada la Xiriira' waxaa loola jeedaa gaadiidka iyo sida koritaanka, sixitaanka iyo adeegga kale ee taageerada (oo ay ka mid yihiin adeegga daaweynta hadalka, adeegga maqalka, adeegga cilmi nafsiga, daaweynta dhaqdhaqaaqa jirka iyo ciyaaraha, madadaalada, oo ay ka mid tahay ku daaweynta madadaalada, adeegga bulshada, adeeggala talinta, oo ay ka mid yihiin adeega daryeelka ee la talinta, iyo adeegga dhaqdhaqaaqa, iyo adeegga caafimaadka, marka laga reebo adeegga aqoonsiga calaamadaha oo ujeedadu tahay qiimeynta kaliya) sida ay muhim ugu tahay gargaarka caruurta naafada ah si ay uga faa'iideystaan waxbarashada gaarka ah, oo ay ka mid yihiin in xilli hore la ogaado oo qiimeyn lagu sameeyo xaaladda naafanimada ee ilmaha.

Dulmar Kooban Ee Nidaamka Waxbarashada Gaarka Ah

Nidaamka waxbarashada gaarka ah waa mid loogu talo galay in lagu xaqiijiyo in arday kasta oo naafo ah uu helo waxbarasho isaga u gaar ah oo wax looga qabto baahida ardayga. IEP (Qorshaha Waxbarashada ee Ardayda U Gaarka Ah) waa qoraal ay soo saareen kooxda IEP. Waalidka waa xubin ka tirsan kooxda go'aanka ka gaareysa waxbarashada ilmaha ee barnaamijka.

Waa muhim in waalidiintu si dhab ah uga qeyb qaataan nidaamka go'aanka loogu gaarayo caruurtooda. Maclumaadka waalidku lawadaago dugsiga waa mid muhim ah.

Waa muhim in waalidiintu fahmaan oo ixtiraamaan ra'yiga shaqaalaha dugsiga. Iyada oo dhinac kala isula dhaqmaan si ixtiraam ku dhisan iyo wada shaqeyn, waalidiinta iyo dugsiyada waxa ay si wanaagsan u wada shaqeyn karaan barnaamijyada ku haboon caruurta.

Ogaashaha Caruurta (Child Find)/Wareejinta Caruurta

Maamulka waxbarashada waa inuu diyaariyaa nidaam lagu ogaado ilmaha naafada ah. Laga ogolaado waalidkood ama dugsiga oo u dira in ilmaha lagu sameeyo qiimeyn lagu ogaannayo haddii uu u baahan yahay adeegga waxbarashada gaarka ah. Waalidiintu waxa ay codsi u soo gudbin karaan waaxda waxbarashada gaarka ah ee dugsiga. Waxyaabaha ka soo bixi kara codsiyada waa:

- In dugsiga ogolaado oo sameeyo qiimeynta.
- In dugsigu go'aan ku gaaro in aan qiimeynta loo baahneyn.

Qiimeynta (Assessment)

Qiimeynta waxaa lagu ogaadaa shuruudaha waxbarshada gaarka ah waa nidaam lagu soo ururiyo macluumaadka ku saabsan ilmaha taasoo loo adeegsanayo haddii ilmuhu ka soo baxay shuruudaha ku xiran adeegga iyo nooca naafanimada ee ilmaha laga caawinayo. Macluumaadkan waxa uu ilmaha ka caawinayaa in la ogaado meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo baahida ee lagu gaarayo go'aanka ku saabsan baahida adeegga ilmuhu u baahan yahay. Waa in waalidiinta bixiyaan ogolaashaha si qiimeynta loo sameeyo.

Qiimeyntu waa in ay noqotaa mid ku haboon ilmaha oo leh dhamaan shuruudaha sharciga ee ku xusan sharciga u degsan. Waalidiinta ayaa ugu wanaagsan ka qeybgalka nidaamka IEP haddii ay fahmaan natiijada ka soo baxda qiimeynta. Haddii aanay waalidiintu ku raacsaneyn natiijada qiimeynta, waxa ay codsan karaan qiimeyn madax banaan (tijaabada oo ay sameeyaan koox ka baxsan maamulka

waxbarashada) iyada oo kharashka ay degmada bixineyso iyada oo la raacayo nidaam u degsan. Ardayda qaarkood oo aan ka soo bixin shuruudaha waxbarashada gaarka ah waxaa laga yaabaa in aadeegga loo qabto sida uu dhigayo Qeybta 504 ee Sharciga Caawinaadda Naafada ee 1973 kaas oo ilaaliya xuquuqda dadka naafada ah. Qorshaha Qeybta 504 waa abuurto kooxdu kaasoo ay ka qeyb qaataan waalidiinta iyo shaqaalaha ardayga u fududeynaya ama u qabanaya adeegga uu u baahan yahay.

Shuruudaha Ku Xiran (Kala shaandheynta)

Kooxada (oo waalidku ka mid yahay) ayaa eega xogta laga soo gudbiyey qiimeynta si ay u ogaadaan in ardayga naafanimo ka muuqato oo uu leeyahay mid ka mid ah qodobada loogu fidiyo adeegga waxbarashada gaarka ah. Shuruudaha laga doonayo qodob kasta waxaa lagu sheegay sharciyada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka.

Kulanka IEP

Kooxda (oo ay ka mid yihiin waalidiinta) ayaa kulma si ay u diyaariyaan barnaamijka loogu adeegayo ilmaha. Kulanka kooxda, waxaa looga doodaa baahida waxbarashada ee ilmaha. Qiyaaso la cabiri karo oo sanadle ah iyo kuwo mudada gaaban ah ayaa la isku raacaa. Iyada oo laga duulayo ujeedooyinkaas, waxyaabaha go'aanka laga gaarayo waa sidii wax looga qaban lahaa baahida waxbarshada ee ilmaha iyo adeegga la xiriira iyo gargaarka dheeraadka ah iyo adeegga loo qabanayo. Qodobada kale ee la tixgelinayo ee la xiriira waxbarashada ilmaha ayaa iyagana u baahan in la tixgeliyo. IEP ayaa qoraal ahaan loogu cadeeyaa adeegga muhimka ah ee loogu adeegayo ilmaha. Sidoo kale IEP waxaa loo adeegsadaa qiimeym ahaan waana mid wax laga bedeli karo markii la doono, ama kooxda ayaa dib isugu imaan kara xilligii la doono.

Kala Guurka

Ugu dameyn da’da 14 jirka, kooxda waxaa waajib ku ah in ay warbixintooda ku daraan baahida adeegga kala guurka ah taasoo ardayga ka caawinaysa inuu ka wareego una wareego marxaladda xigta ee dugsiga. Adeegga kala guurka waa in loo fidiyaa laga bilaabo da’da lix iyo toban jirka.

Halka uu ka bilaabayo (Meeleynta)

Kooxda (oo ay waalidku ka mid yihiin) ayaa go'aan ka gaara halka uu ilmuhu ka bilaabayo taasoo ku saleysan barnaamijyada la isku raacay kulanka IEP. Kooxdu waxa ay is "Weydiinayaan xagee adeeggan Loogu qabanayaa?" Ardayga waa in adeegga loogu qabtaa Goobta Xayiraadda Ugu Yar (LRE) ee ugu haboon ilmaha.

Dib U Eegista Sanadlaha Ah

Kooxda (oo ay waalidku ka yihiin) ayaa kulma ugu yaraan hal mar sanadkii si ay u qiimeeyaan guud ahaan barnaamijka ilmaha iyo wax ka bedelka IEP. Haddii ay cadaato in aanu ilmuhu xiliagan wixii ka dambeeya ka soo bixin shuruudaha waxbarashada gaarka ah, waxa uu ilmuhu sii wadayaa nidaamka IEP oo joojinayaa barnaamijka.

Xuquuqda Marista Nidaamka

Waxa aad xaqu u leedahay in ra'yiga laga ku diidi karto dhamaan inta uu socdo nidaamkan. Haddii ay taasi dhacdo, waxa aad xaq u leedahay in lagu mariyo nidaamka xuquuqdaada (sharciga ah), oo ay ka mid tahay kuwa sharcigu kuu ogol yahay. Xuquuqdaas waxaa lagu faahfaahiyey oo aad ka heleysaa xuquuqda waalidka oo dugsigu ku siiyo.

Tani waa mid aad u kooban oo ku saabsan nidaamka waxbarashada gaarka ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka IEP, fadlan soo booqo bogeena internetka ee www.utahparentcenter.org. Halkaas waxa aad ka heleysaa Fiidiyoowga Tababarka ee "Waalidiinka oo Qeyb ka ah Nidaamka IEP" ama aad kala soo dagi kartaa buuga "Waalidiinka oo Qeyb ka ah Nidaamka IEP"

Haddii aad u baahan tahay caawinaad…

Haddii aad qabto dareen ama su'aalo ama aad dooneyso macluumaad aad u faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqdaada iyo mas'uuliyadda ku saaran, waxaa haboon in aad marka ugu horeysa weydiiso waaxda waxbarashada gaarka ah ee ee dugsiga ilmahaagu dhigto. Haddii ay jiraan dhibaatooyin aadan xal kala gaari karin dugsiga, waxa aad la xiriiri kartaa waaxda waxbarashada gaarka ah ee maamulka waxbarashada (degmada). (Waxaa kale oo aad la xiriiri kartaa dugsiga ama

maamulka waxbarashada ama xiriiriyaha Qeybta 504 wixii dareen ah ama su'aalo aad qabtaan.

Xarunta Waalidiinta ee Utah (Utah Parent Center)

Tan iyo 1983kii, shaqaalaha Xarunta Waalidiinta ee Utah ayaa gacan ka geystay in ay bedelaan nolosha ilmo naafo ah. Waxaanu nahay waalidiin gargaar u fidinaya waalidiin kale. Waxa aanu fahamsanahay sida uu dareenkiinu tahay marka aad heysataan ilmonaafo ah. Waan dareemeynaa sida aad dareemeyso. Farxad iyo isku buuq labada waan la ooynay, halkana waxa aan u joognaa in aan ku caawino. Tababaro lacag la'aan ah oo la idiin qabto, gargaarka qof ahaaneed, iyo macluumaadka guud ee ku qoran afka Ingiriisiga iyo afafka kale ee gobolka Utah oo dhan - waxaanu caawinaa qoysaska iyo caruurtooda leh baahida gaarka ah - in ay helaan gargaarka ay u baahan yihiin.